



**UJEEDO: WAKAALAD GUUD "PROCURO DE GENERALE"**

**Maanta** oo ay taariikhdu tahay **22/11/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Tajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

**WAKAALAD BIXISO:-** ZAMZAM MOHAMED JELLE, Hooyo: Sacdiyo Cabdi Shuuriye, Somali ah, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 05/05/2000, Sidata: Somali Passport, Lr. P01117383

**LA WAKIISHE:-** SADIA ABDI SHURIYE, Hooyo: Aamino Axmed Jaamac, Somali ah, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 01/01/1983, Degan Dayniile, Sidata Kaarka Aqoonsiga, Lr. 100007056, Kana soo baxay Dowlada Goboleedka Jubaland .

**B-** Aniga oo ah **ZAMZAM MOHAMED JELLE**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Hooyadeey **SADIA ABDI SHURIYE** una wakiishay qeybta dhaxalka ee aan ku leeyahay dhamaan hantida guurtada iyo maguurtada isugu jirta ee uu ka geeriyooday Aabaheey Marxuum **MAXAMED JEELLE ROOBLE**, kuna Qoran Magaciisa Mood & Noolba leh, kuna taala Gobolka Banaadir iyo Gobalada kale ee dalka sida guri, dhul banaan, goof, beer, Sheer shirkadeed, gaadiid, I.W.M. Waxaana si buuxda ugu wakiishay in Qaybtayda ay gadi karto, Wareejin Karto, Hibeyn karto, dhisi karto, ijaari karto, u dacwoon karto, qareen u qaban karto, igu matali karto magaceyga dhan kasta la iiga baahdo, iina qaadi karto Qismigeysga dhaxaleynd ee uu nasiibkeyga noqdo, iigana doodi karto maxkamadaha dalka darajadooda kala duwan, iina sameen karto waraaqaha dhaxalkoobka ah, isla markaasna ii saxiixi karto kaalinteyda ku aadan dhamaan waraaqaha la iiga baahdo suul iyo saxiixba sida waraaqaha dhaxalkoobka ah, una idman tahay in ay si buuxda Maxkamaddaha hortooda iiga Doodi karto, insha'allaahu.

Waxaan mar kale sii caddeynayaa in Hooyadeey **SADIA ABDI SHURIYE** awoodaas aan siiyay ay u madax banaan tahay oo aniga Qeyb dhaxaleedkaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

**T-** Aniga oo ah **SADIA ABDI SHURIYE**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiisay Gabadheyda **ZAMZAM MOHAMED JELLE**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

**SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA**

ZAMZAM MOHAMED JELLE

*Zam Zam*

1- ABDIHAKIM ABDI SALAT

*ABDIHAKIM*

**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

**SAXIIXA LA WAKIISHAHA**

SADIA ABDI SHURIYE

*SADIA*

2- ABDIKAFI ABDI ALI

*ABDIKAFI*

**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

**REP. 1966/T.P.N/25, Tr. 22/11/2025**, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- ZAMZAM MOHAMED JELLE** Ahna (Wakaalad Bixiso), **2- SADIA ABDI SHURIYE** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

**NOOTAAYAHA**

**Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**

*Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"*








**FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA**

**Tr. 30/11/2025**

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Sacdiyo Cabdi Shuuriye** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Guud ee **Rep No. 1966/T.P.N/25, Tr. 22/11/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca La Wakiishaha</b>	Sacdiyo Cabdi Shuuriye
<b>Nooca</b>	Wakaalad Guud
<b>Loo Wakiishay</b>	Dhamaan Hantida Wakaalad Bixisada Zamzam Maxamed Jeele
<b>Taariikhda Wakaalada</b>	22/11/2025

**La Wakiishe:** Aniga oo ah **Sacdiyo Cabdi Shuuriye**, Leh Tel No. **0616227990**, Degan **Dayniile** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Maxamed Cabdi Cali**

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**Sacdiyo Cabdi Shuuriye**

*Sacdiyo*

